



Dugsiga Sarre Lincoln wuxuu qabanayaa shir su'aalo looga jawaabayo oo uu soo bandhigi doono taariikhyahan matalaya Abraham Llincoln

Ka soo qeybgal dabaaldegga 150naad ee waxbarashada dadweynaha gobolka Oregon oo ku began maalintii gobolkan Oregon noqday gobol. Waxaa daawataa [Steve Holgate](#), oo ah taariikhyahan caan ah oo matalaya Madaxweyne Abraham Lincoln, Qolka Shirarka waxaa loo qaabeeyey qaab su'aalaha dadku qabaan looga jawaabo luqadii iyo fikradihii sanadkii 1869.

Kulanka Su'aalaha lagaga jawaabayo waxaa la qaban doonaa maalinta Arbacada, bisha Febraayo 14keeda, waxaana lagu qaban doonaa Hoolka Bandhigyada Dugsiga Sarre Lincoln, cinwaankiisu yahay 1600 SW Salmon St. Munaasabadani waxay socon doonaa 9:30 subaxnimo ilaa 10:30 subaxnimo iyada oo uu daadihin doono Chet Orloff, Agaasiimihii Hore ee Taariikhyahanada Oregon iyo arday ku jira fasalka 12naad ee Lincoln oo la yiraa Will Duffy.

Kulanka Su'aalaha lagaga jawaabayo waxa loo soo bandhigay sidii looga qeybgali lahaa Sanad-Guurada 150naad ee Lincoln ee sanadkan 2018-19. Dugsigan Lincoln waa iskuulka ugu da'da weyn Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxaa la furay 1869.

Sidoo kale, waxaa iyadana loo dabaaldegayaa Maalintii uu gobolkani Oregon noqday gobol, dabaaldegani waxaa lagu soo galayaa lacag la'aan bisha Febraayo 14keeda, goobtuna waa Madxafka lagu ururiyo taariikhda Oregon (Oregon Historical Society).

-Rosie Fiallo